

# Hagahaaga ku aadan codbixinta Doorashada Guud ee 2023.



E231 06/23 Somali



## Faham waxa la filan karo iyo sida loo codeeyo sanadka 2023

### Xaqiiji in aad diiwaangashan tahay oo xogtaaduna ay tahay mida ugu cusub.

Si aad u codeeyso, waxaad u baahan tahay in lagu diiwaangeliyo. Waa inaad isdiiwaangelisaa haddii aad jirto 18 sano ama ka weyntahay, muwaadin New Zealand ah ama degane rasmi ah, oo aad si joogto ah ugu noolayd New Zealand 12 bilood ama ka badan wakhti ka mid ah noloshada.



### Iska diiwaangeli, hubi ama cusboonaysii faahfaahintaada onlaynka

Way fududahay in onayn la iska diiwaangeliyo, laga hubiyo ama laga cusboonaysiiyo faahfaahintaada adigoo isticmaalaya shatiga darawalnimada New Zealand, baasaboorka New Zealand ama aqoonsiga ay RealMe xaqiijiso.

- Tag [vote.nz](#)
- Wac **0800 36 76 56**
- Farriin qoraaleed lacag la'aan ah ugu dir magacaaga iyo cinwaankaaga **3676**



### Xirmadaada EasyVote

Haddii aad isdiiwaangeliso Axadda 10-ka Sebtembar, waxaad boostada ku heli doontaa xirmada EasyVote.

Xirmadaada EasyVote ayaa kuu sheegi doonto goorta aad codayn karto iyo cidda aad codkaaga siin karto. Xirmadaada waxaa sidoo kale ka mid noqon doona kaarkaaga EasyVote ee gaarka ah, kaas oo fududaynaayo codaynta. Weli waad codayn kartaa adigoo aan haysan kaarkaaga EasyVote, laakiin muddo dheer ayay qaadan kartaa.

Haddii aad isdiiwaangeliso wixii ka dambeeya Axadda 10-ka Sebteembar, oo ay ku jirto maalinta doorashada, ma heli doontid kaarkaaga EasyVote. Waxaad u baahan doontaa inaad bixiso cod gaar ah, taas oo qaadanaysa mudda dheer.

### Codeyntu waxay furmaysaa:

9-ka subaxnimo maalinta Isniinta  
2-da Oktoobar

### Codeyntu waxay xirmaysaa:

7-da fidnimo maalinta doorashada,  
Sabtida 14-ka Oktoobar



### Marka goobaha codbixinta ay furan yihiin iyo meesha laga helayo

Waxaad iska diiwaangelin kartaa kana codayn kartaa Doorashada Guud goob kasta oo codbixineed laga bilaabo Isniinta 2-da Oktoobar ilaa maalinta doorashada, Sabtida 14-ka Oktoobar.

Markay ay tahay maalinta doorashada, Sabtida 14-ka Oktoobar, dhammaan goobaha codbixinta waxay furnaan doonaan 9-ka subaxnimo ilaa 7-da galabnimo.

Macluumaadka ku saabsan goobaha iyo saacadaha la furayo goobaha codbixinta waxaa laga heli karaa [vote.nz](#) ama adigoo wacaayo **0800 36 76 56** laga bilaabo bartamaha Sebtembar.



### Meesha laga helaayo macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan diiwaangelinta iyo codbixinta

- Booqo [vote.nz](#)
- Wac **0800 36 76 56**

Haddii macluumaadkani uu waxtar u leeyahay qof aad taqaano, fadlan u sheeg wax ku saabsan.

Macluumaadka ku saabsan diiwaangelinta iyo codeynta ayaa sidoo kale la heli karaa iyadoo ku qoran luqado iyo qaabab kale oo laga heli karo [vote.nz](#)

# Sida loo codeeyo

## 1 La imow kaarkaaga EasyVote

Qaado kaarkaaga EasyVote maadaama uu kuu fududayn doono codaynta. Weli waad codayn kartaa haddii aad soo hilmaanto kaarkaaga ama aadan mid haysanin.



## 2 Waxaa jiri doona qof jooga goobta codbixinta oo ku caawinaaya

Shaqaalaha doorashada ee ku sugan goobtaada codaynta ayaa ku tusi doona waxaad samayn lahayd iyo meesha aad aadi lahayd.



## 3 Ka codee doorashada guud


Waqtiga doorashada guud, waxaad helayaa laba codood – cod xisbiyeed iyo cod aad siiso musharax deegaankaaga ka taagan.

### Codka xisbigaaga

Codka xisbigaagu waxaa loogu talagalay xisbi siyaasadeedka aad doonayso inaad taageerto. Codayntani waxay inta badan go'aamisaa tirada guud ee kuraasta xisbi walba uu ka helayo Baarlamaanka. Xisbiyada saamiga ugu badan ku leh codka xisbiga ayaa kuraas badan ka heli doona Baarlamaanka.

Waxaad ka dooran kartaa isla liiska xisbiyada siyaasadda haddii aad ku jirto diiwaanka guud ama diiwaanka Māori.

Warqadaada codbixinta, sax saar magaca xisbi siyaasadeedka ee aad doorbidayso.



### U codayntaada musharax deegaankaaga ka taagan



Codka aad siiso musharax ka taagan deegaankaaga waa in aad doorato musharax aad jeclaan lahayd in uu xubin Baarlamaan (MP) u noqdo deegaanka aad ku nooshahay.

Musharaxa ugu codka badan cod-helayaashaada ayaa noqonaya xildhibaan aad soo dooratay. Waxay degaankaaga ku matali doonaan golaha Baarlamaanka.

Haddii aad ku jirtid liiska Māori, waxaad u codeyneysaa musharaxa u taagan codka Māori.

Haddii aad ku jirtid liiska doorashada guud, waxaad u codeyneysaa musharaxa u taagan doorashada guud.


Warqadaada codbixinta, sax saar magaca musharaxa aad si aad ah u jeceshahay inuu matalo aagga deegaankaaga.



Saamigan codadka xisbigu leeyahay = Wuxuu la mid yahay saamiga kuraasta Baarlamaanka

## 4 Geli warqadaada codbixinta sanduuqa lagu siiyay ee warqadda codaynta

Taasina waa sidaas – waad codaysay!



## Ma tagi kartid miyaa goobta codbixinta?

Haddii aadan tagi karin goobta codbixinta, tusaale ahaan, sababo la xiriira xanuun, da' ama naafanimo, waxaad heli kartaa caawimaad si aad u codeeyso. Wax badan ka ogow barta [vote.nz](http://vote.nz) ama wac **0800 36 76 56** si aad ugala hadasho ikhtiyaaradaada.

Haddii aad ku sugan tahay guri daryeel, Maareeyaha Doorashada ee degaankaaga ayaa la xiriiri doona maareeyaha gurigaaga daryeelka si uu u habeeyo adeegyada codbixinta.

Haddii aadan tagi karin goobta codbixinta maadaama aad ku jirto isbitaal, laga bilaabo Isniinta Oktoobar 2-deeda, saaxiib ama xubin qoyska ka mid ah ayaa kuu keeni kara warqadaahaaga codbixinta.

## Ka codaynta daafaha caalamka

Haddii aad ka codaynayso daafaha kale ee caalamka, waa in lagu diiwaangeliyaa saqda dhexe Jimcaha 13-ka Oktoobar. Waxaad iska diiwaangelin kartaa ama ka cusboonaysiin kartaa macluumaadkaaga barta [vote.nz](http://vote.nz)

Waxaad ka codayn kartaa daafaha caalamka laga bilaabo Arbacada 27-da Sebteembar ilaa 7 fiidnimo Sabtida 14-ka Oktoobar (waqtiga NZ).

Habka ugu fudud uguna dhakhsiyaha badan ee aad daafaha kale ee caalamka uga codayn karto waa inaad soo dejisato oo aad buuxiso warqadaada codbixinta ka dibna aad soo galiso barta [vote.nz](http://vote.nz)

**Taleefanka daafaha caalamka:** +64 9 909 4182 (sicirada wicitaanka caalamiga ah ayaa lagu dabaqi karaa)

**Taleefanka New Zealand:** 0800 36 76 56

## Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo akhrinta ama calaamadaynta waraaqahaaga codbixinta?

Saaxiib, xubin qoyska ka tirsan, ama sarkaalka doorashada ayaa kaa caawin kara inaad akhrido ama calaamadayso warqadaada codbixinta. Qofkaasi ayaa awood u leh:

- inuu kula galo gadaasha shaashadda codbixinta
- inuu kuu akhriyo erayada iyo macluumaadka ku qoran warqada codbixinta
- inuu kuu calaamadeeyo warqada codbixinta haddii aad sidaas weydiisato.

Kuuma sheegi karaan cidda ay tahay inaad u codayso doorashada guud.

Haddii aad indhoole tahay, qayb ahaan indhoole tahay ama aad leedahay nafo jireed taas oo macnaheedu yahay in aadan calaamadayn karin warqadaada codbixinta caawimaad la'aan, waxaad ku codayn kartaa adigoo isticmaalaya adeegga ka yeerinta khadka taleefanka.

Inaad isdiiwaangeliso ayaad u baahan tahay si aad u isticmaasho adeegan. Wac **0800 028 028** oo dooro ikhtiyaarka taad si aad isku diiwaangeliso.

Waxaad isdiiwaangelin kartaa laga bilaabo Isniinta 11-ka Sebteembar ilaa duhurkii, Sabtida 14-ka Oktoobar.

Booqo [vote.nz](http://vote.nz) si aad wax badan uga ogaato adeegan.